Dib loo eegay Sebtember 30, 2021

Amarka Fasalka ee COVID-19 ee Iskaarantiilka

Waa maxay Amarka Fasalka COVID-19 ee Iskarntiilku?

"Amarka fasalka" ayaa ku amraya dadka ku hoos jira amarka in ay guriga joogaan oo ay is karanoobaan illaa aynan faafin. Ujeeddada ayaa ah in la yareeyo faafitaanka COVID-19, lana ilaaliyo caafimaadka qof kasta oo ku nool Toronto.

Caafimaadka Dadweynaha Toronto miyuu soo saari karaa amar fasal, intee in leegna ayuu dhaqan gelayaa?

Sharciga Badbaadinta iyo Kobcinta Caafimaadka ee gobolku wuxuu u oggolaanayaa Sarkaalka Medical ee Caafimaadka inuu soo saaro "amar fasal." Amarka waxaa markii ugu horraysay la soo saaray Abriil 1, 2020, waxaana ugu danbayn wax laga beddelay Sebtember 30, 2020. Amarku wuxuu dhaqan galayaa illaa Sarkaalka Medical ee Caafimaadku uu ku dhawaaqo in aan mar dambe loo baahnayn.

Yuu ku dabaqaa amarka fasalka?

Amarka fasalka waxaa loogu talagalay:

- Dadka qaba calaamadaha COVID-19.
- Dadka baaritaanka lagaga helay COVID-19.
- Dadka dhawaan xiriir dhow la yeeshay shaqsi laga helay cudurka COVID-19. Tan waxaa ka mid ah daryeelayaasha iyo xubnaha guriga, iyo dad kale oo laga yaabo inay aqoonsadaan Caafimaadka Dadweynaha Toronto.
- Dadka sida kale ay u tilmaamtay Caafimaadka Dadweynaha Toronto inay iskarantiilaan.

Waalidiinta / wakiilada dadaka da'doodu ka yar tahay 16 sano jir kana mid ah qeybahaas ayaa mas'uul ka ah hubinta in qofka ka yar 16 sano uu raaco shuruudaha amarka fasalka.

Mudo intee le'eg ayay dadku iskood isku karantiilaan?

Shuruudaha is-karantiimeynta ayaa la cusbooneysiiyay Sebtember 30, 2020 si loogu daro tilmaamaha Caafimaadka Dadweynaha ee cusub ee Toronto.

- Dadka qaba cudur khafiifa ama dhexdhexaada waa inay go'doomaan 10 maalmood oo ka bilaabanaysa kadib maalintay astaamahoodu bilaabaan, ama laga bilaabo 10 maalmood kadib markay heleen baaritaan togan haddii aysan lahayn astaamo.
- Dadka qaba xanuun daran (oo u baahan taageero heer ICU ah) ama kuwa si aad ah u difaaca jirka waa inay go'doomaan 20 maalmood laga bilaabo maalinta ay astaamahoodu bilaabameen.

- Dadka xiriirka dhow la leh qof qaba COVID-19 waa inay iskarantiilaan ugu yaraan 10 maalin kadib xiriirkooda ugu dambeeyay ee ay la yeesheen qofkaas laga bilaabo kadib maalinta xiriirkoodii ugu danbeeyay.

Dadka qaar ma laga dhaafi karaa amarka fasalka?

Qaar ka mid ah shaqaalaha adeegga aasaasiga ah, oo xiriir dhow la leh wax calaamado ah ayaa loo oggolaan karaa inay shaqeeyaan. Si kastaba ha noqotee, waa inay iskood uga go'doomaan guriga markay shaqeynayaan ama u socdaalayaan ama ka imaanayaan shaqada. Ka-reebitaan ayaa sidoo kale lagu sameyn karaa xaaladaha kale, tusaale ahaan dadka ka tagaya rabshadaha guriga. Caafimaadka Dadweynaha Toronto wuxuu dib u eegi doonaa waxyaalaha ka reeban xaalad kasta wuxuuna go'aamin doonaa inuu ka reeban yahay iyo in kale.

Dadku miyey ku khasban yihiin inay is-karantiimeeyaan haddii ay si buuxda u tallaalan yihiin?

Dadku si buuxda ayay u tallaalanyihiin haddii ugu yaraan 14 maalmood ay soo dhaaftay tan iyo markii ay heleen:

- Qiyaaso dhammaystiran oo isu-xiga oo ah tallaalada COVID-19 oo ay oggolaatay Caafimaadka Kanada isku-dar kasta.
- Mid ama laba qiyaasood oo ah tallaalka COVID-19 oo aysan oggolaan Caafimaadka Kanada oo leh hal qiyaas oo tallaalka COVID-19 ah oo ay oggolaatay Caafimaadka Kanada, maadaama ay ku qanacsan tahay Caafimaadka Dadweynaha Toronto, ama
- Saddex qiyaasood oo ah tallaalka COVID-19 oo aysan oggolaan Caafimaadka Dadweynaha, maadaama ay ku qanacsan tahay Caafimaadka Dadweynaha Toronto.

Dadka si buuxda loo tallaalay ee leh astaamaha COVID-19 waa in la baaro oo la karantiilo inta la sugayo natiijooyinka baaritaanka. Haddii ay laga waayo cudurka, waxay awoodaan inay ka soo baxaan iskarantiilka marka ay astaamahoodu ku soo fiicnaanayaan 24 saacadood oo aysan lahayn qandho iyagoon isticmaalin daawooyinka yareeya qandhada; haddii ay leeyihiin astaamo caloosha ah (tusaale ahaan, lallab, calool xanuun, shuban), astaamahan waa inay ku soo fiicnaanayaan 48 saacadood kahor intaan laga soo bixin iskarantiilka.

Dadka si buuxda loo tallaalay ee laga helo cudurka waa inay iskarantiilaan 10 maalmood laga bilaabo maalintay astaamahoodu bilaabameen, ama laga bilaabo 10 maalmood kadib maalintay helaan baaritaan togan haddii aysan lahayn astaamo, haddii aysan sida kale amrin Caafimaadka Dadweynaha ee Toronto.

Dib loo eegay Sebtember 30, 2021

Dadka si buuxda loo tallaalay ee xiriir dhow la lahaa shaqsi qaba COVID-19 waa laga dhaafi karaa karantiilka haddii, lagu daro in si buuxda loo tallaalo, ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha soo socda:

- Astaamo la'aan (aadan lahayn wax calaamado ah)
- Ma lihid habdhis difaaca jirka oo daciif ah (tusaale ahaan, ma helin xubinta ama unug laguu beddelay, ama ma qaadaneyso kemotherabi ama daaweynta hoos u dhigga difaaca jirka)
- Aanu ahayn mi u jiifa daryeel muddo-dheer ah ama guriga hawlgabla ama bukaan la seexiyay goob daryeel caafimaad

Xitaa haddii laga dhaafo iskaarantiilka, dadka xiriirka dhow ee sida buuxda u tallaalan:

- Waa inay raacaan talaabooyinka caafimaadka bulshada, sida wejiga qarsoon iyo kala-fogeynta jirka meesha loo baahdo.
- Waa in ay ka fogaadaan booqashooyinka aan daruuriga ahayn ee goobaha dadka nugul ama ay joogaan tiro badan oo ah dadka aan istallaalin (tusaale ahaan, iskaa wax u qabso ama booqashada guriga daryeelka muddada-dheer, hoy, iskuul ama goobta xannaanada ilmaha) muddo 10 maalmood ah kadib soo-gaadhistii ugu danbaysay.
- Waxaa lagu dhiirrigeliyay inay u soo sheegaan soo-gaadhistooda loo-shaqeeyaha oo ay raacaan wixii xaddidaad ah ee uu u baahan yahay maareeyehooda iyo/ama Waaxda Caafimaadka Shaqada, iyadoo la raacayo Hagaha ku-meelgaarka ah ee Wasaaradda Caafimaadka ee Sebtember 14, 2021

Dadku miyay qasab ku tahay inay iskarantiilaan haddii ay qabaan infekshanka COVID-19 oo dhowaan dhacay?

Dadka qaba infekshanka COVID-19 oo dhowaan ah waa kuwa 90-kii maalmood ee la soo dhaafay laga helay baadhitaanka togan ee COVID-19 oo laga sifeeyey infekshankii hore.

Dadka qaba infekshanka COVID-19 ee dhowaan oo hadda leh astaamo cusub oo COVID-19 ah waa in la baaraa waana inay is-karantiiliyaan inta ay sugayaan natiijooyinka baaritaanka. Haddii laga waayo cudurka, waxay awoodaan inay ka soo baxaan iskarantiilka marka ay astaamahoodu soo fiicnaadaan 24 saacadood oo aysan lahayn qandho iyaga oo aan qaadan daawada qandhada yaraysa; haddii ay lahaayeen wax calaamado caloosha ah (tusaale, lalabbo, calool xanuun, shuban), calaamadahani waa inay ku soo fiicnaadaan 48 saacadood kahor inta aysan ka soo bixin karantiilka.

Dadka qaba infekshanka COVID-19 ee dhowaan laga helay cudurka waa inay is-karantiilaan 10 maalmood oo ka bilaabanta maalinta astaamuhu bilaabmaan, ama 10 maalmood oo ka bilaabanta maalinta la helo baaritaanka togan haddii aysan lahayn astaamo, haddii aysan si kale u tilmaamin Toronto Caafimaadka Dadweynaha.

Dib loo eegay Sebtember 30, 2021

Dadka qaba infekshanka COVID-19 ee dhowaan oo xiriir dhow la lahaa qof qaba COVID-19 waxaa lagu dhaafi karaa ka karantiilka haddii, marka la isku daro, ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha soo socda:

- Ay yihiin astaamo la'aan (aan lahayn wax calaamado ah)
- Aysan lahayn habka difaaca jirka daciifka ah (tusaale ahaan, aan helin xubin ama unug beerid, ama aan qaadanayn daawooyinka kansarka ama difaaca daciifiya)
- Aysan deganayn daryeelka muddada dheer ama guriga hawlgabka ama bukaan la dhigay goob caafimaad.

Xitaa haddii laga dhaafo iskarantiilka, xiriirada dhow ee laga helay cudurka dhowaan:

- Waa inay isku baaraan sida ugu dhaqsaha badan 7 maalmood ama kadib soo-gaadhistii ugu danbeysay.
- Waa in la raaco tallaabooyinka caafimaadka guud, sida maaskarada iyo kala-fogeynta jirka halka looga baahan yahay
- Waa in ay ka fogaadaan booqashooyinka aan daruuriga ahayn ee goobaha ay ku nool yihiin dadka nugul ama ay joogaan dad badan oo aan la tallaalin (tusaale ahaan, iska wax uqabasada ama booqashada hoyga daryeelka muddada-dheer, hoy, iskuul ama goobta xannaanda carruurta) muddo 10 maalmood ah kadib soo-gaadhistii ugu dambaysay.
- Waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u soo sheegaan soo-gaadhista loo-shaqeeyahooda oo ay raacaan wixii xaddidaad ah ee uu uga baahanyahay maareeyahoodu iyo / ama Waaxda Caafimaadka Shaqada, iyadoo la raacayo Hagaha kumeelgaarka ah ee Wasaaradda Caafimaadka ee Sebtember 14, 2021

Sidee ayuu iskarantiilku u shaqeeyaa?

Iskarantiil macnihiisu waxa weeye joogista guriga ama xarunta karantiilka. Dibedda ha u bixin ama marti ha ku yeelan. Ka fogow xiriir dhow dadka kale. Waxay sidoo kale ka dhigan tahay in laga fogeeyo dadka kale ee guriga ku nool sida ugu macquulsan. Isticmaal musqul iyo qol jiif ah, haddii ay suurogal tahay. Markaad wadaageyso qolalka, u fur daaqadaha hawo wanaagsan. Dukaanka ka adeego ama qof ha kuu soo qaado alaabta. Fadlan ka wac Caafimaadka Dadweynaha Toronto telefoonka 416-338-7600 si aad talo uga hesho haddii raashinka, rijeetooyinka ama adeegyada kale loo baahan yahay. Eeg sida laysku karantiilo.

Dadka aan haysan guri u oggolaanaya inay iskakarantiilaan dadka kale, ee la soo deristay hoy la'aan, ama dareemaya inay guryahooda ku nabadgeli karin ayaa la siin karaa hoy ku meelgaar ah. Fadlan ka wac Caafimaadka Dadweynaha Toronto telefoonka 416-338-7600 si aad ugala hadasho u-qalmitaanka.

Dib loo eegay Sebtember 30, 2021

Dadku ma xaadiri karaan ballamaha caafimaadka inta ay gooni isu-taagga yihiin?

Dadku weli way aadi karaan ballamaha caafimaadka ee muhiimka ah markay ku jiraan iskarantiilka. La xiriir Caafimaadka Dadweynaha Toronto telefoonka 416-338-7600 si aad u hesho tilmaamo kahor intaadan aadin rug caafimaad ama cusbitaal.

Ballamaha tallaalka waa in dib loo dhigaa illaa ka dib marka iskarantiilka la dhammaystiro.

Maxaa dhacaya haddii dadku aysan iskarantiilin?

Dadka aan u hoggaansamin amarka fasalka waxaa lagu soo oogi karaa oo lagu ganaaxi karaa ilaa $ 5,000 maalintii haddii lagu helo dambigaas.

Maxay dadku ugu khasbanyihiin inay siiyaan magacyada xiriirka iyo macluumaadka kale Caafimaadka Dadweynaha Toronto? Sidee loo ilaaliyaa xogtooda gaarka ah?

Marka la codsado, dadka uu daboolayo amarka fasalka waa inay siiyaan Caafimaadka Dadweynaha Toronto magacyada iyo macluumaadka xiriirka (lambarrada taleefannada, cinwaanada, cinwaanada emaylka) cid kasta oo ay xiriir dhow la leeyihiin inta lagu jiro taariikhaha iyo xilliyada ay cayimtay Caafimaadka Dadweynaha Toronto. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya raadinta xiriirka.

Bixinta macluumaadkan waa mid muhiim ah. Waxay u suurtagelisaa Caafimaadka Dadweynaha Toronto inay wax ka qabato kahortagga u gudbinta cudurrada dadka kale. Awoodayada la wadaago ee ah in aan ka dhigno iskuulada, ganacsiyada iyo howlaha kale ee muhiimka ah bulshada in laga furo Toronto iyo guud ahaan Ontaariyo waxay kuxirantahay awooda Caafimaadka Dadweynaha ee Toronto ee qabashada shaqadan muhiimka ah.

Caafimaadka Dadweynaha Toronto wuxuu fahamsan yahay in dadku ay walaac ka qabaan qarsoodi ahaantooda. Dhammaan macluumaadka ay uruuriso Caafimaadka Dadweynaha Toronto waxaa ilaaliya sharciga Ontario ee asturnaanta macluumaadka caafimaadka, *Xeerka Ilaalinta Macluumaadka Caafimaadka Shakhsiyeed, 2004*.

Dadku sharci ahaan ma uga doodi karaan amarka fasalka?

Dadka amarka fasalka lagu dabaqo ayaa kahor imaan kara iyaga racfaan u gudbinaya Gudiga Rafcaanka iyo Dibu-fiirinta Adeegyada Caafimaadka.

Dib loo eegay Sebtember 30, 2021

Maxay dadku uga baahan yihiin inay ka ogaadaan amarka federaalka ee hoos imanaya Xeerka karantiilka?

Amarka karantiil federaalku wuxuu khuseeyaa dhammaan socotada soo geleysa Kanada, laga bilaabo Maarso 25, 2020. Waxay u baahan tahay dhammaan socotada inay is karantiil gaaraan muddo 14 maalmood ah, marka laga reebo qaar ka mid ah safarayaasha si buuxda loo tallaalay. Eeg Government of Canada's information for travellers.

IXaaladaha qaarkood, dadka ay tahay in karantiil looga dhigo amarka federaalka ayaa sidoo kale lagu qaadi karaa amarka fasalka (tusaale ahaan, dadka laga helo COVID-19 oo waliba dhawaan ka soo laabtay safarka).

Macluumaad Dheeraad ah

Qiimaynta caafimaadka, ka wac xafiiska dhakhtarka ama Telehealth Ontario 1-866-797-0000. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan amarka fasalka, ka wac Caafimaadka Dadweynaha Toronto taleefanka 416-338-7600.